

Soo dhawaaw oo booqashasho wanaagsan.

Soo dhawaaw, waad booqan kartaa reerka/chelka iyo asxaabta ku jira isbitaalka ama hoyga daryeelka. Covid-19 waa fayrus qatar ah oo dhibaatooyin badan gaarsiin kara waayeelka iyo dadka xanuunsan.

Sidaas darteed waa muhiim inaan raacno talooyinkaan.

- Ha booqanin qof xanuunsan oo isbitaal ama hoyga daryeelka ku jiro hadii aad adiga xanuunsantahay.
- Ha booqan sidoo kale hadii aad sugayso jawaabta baaritaanka covid-19
- Ha booqan hadii aad ka maqnayd wadanka 10 kii maalmood ee u danbeeyay.
- Ha booqan hadii aad ku jirto karantiil, ama aad xiriir laleedahay qof qaba firuska.

Hadii aad booqasho u tagayso Isbitaalka ama hoyga daryeelka, fadlan xasuuso:

- Waa inaad la balantaa meesha aad booqashada u tagayso. Taleefan ka wac.
- Iska dhaq gacmaha markaad tagayso iyo markaad ka baxayso.
- Ka fogoow qofka jiran iyo shaqaalahaba 1. meter
- Waxaad booqashada kuwada tagi kartaan 2-3 qofood.
- Martida waa inay ku jirtaa qolka qofka ay booqanayso ama ay tagaan banaanka.
- Lama ogola in la isugu yimaado ama lagu sugo qololka guud.
- Markaad timaado waxaa lagu waydiin doona inaad magacaaga qorto oo aad cadayso inaad caafimaad qabto. Tan waa iqtiyaari/ma aha qasab. Laakin waxay nagu caawinaysaa inaan ogaano dadka booqashada u yimi hadii fayruska uu ka dilaaco meeshaas iyada ah. Magacaaga waa laga tirtiraayaa 10 maalmood kadib.

Dadka qaarkood waxay dagan yihii hoyga gargaarka, oo u kammunka ku caawinaa, iyaga oo leh guryo, ama adrees gaar ah. Kommunaha ma kuu goaamin karo qofka kugu soo booqan karo gurigaaga. Laakin waxaan kaa codsanaynaa inaad raacdo talooyinkaan aan soo sheegnay.

Covid- 19 sida aan ognahay waa fayrus qatar ah oo si fudud u faafa.

Hadii aadan hubin sharciyada amaa talooyinka lagaa rabo inaad oofiso, fadlan la xariir meesha aad booqanayso.

Wadajir ayaan kaga gudbi doonna tan.

Waad mahadsantihin

Skien Kommune

telefn 355810000

